# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:07 AM** | **Hansard No.25/2** | **Kal-fadhiga 25aad**

***Fadhigii 8aad 23/08/2014***

**Dooda Xeerka Ganacsiga Baananka oo socotey 2 Maalmood waxaa ka qeyb-galey 13 Mudane**

**Gudoomiyaha:-** Mudanayaal sideynu manta u balansaneyn waxaynu bilaabeyna dooda Xeerka Ganacsiga Baananka oo Salaasadii Mudanayaasha loo qeybiyay, Xogheyntu ha soo qorto Mudanayaasha dooda ka qeyb-qaadanaya ee Xeerka soo akhriyay si aynu u guda-galno dooda.

1. **Md. Aadan X. Diiriye Dirir:-** shir-gudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada iyo Xogheynta waxaan idinku Salaamayaa Salaanta Islaamka ASAALAMA CALEYKUM WA RAXMATULAAHI, Intaana xeerka Gudihiisa galin waxaan jeclahay inaan wax yar ka horeysiiyo oo ah qoraalka Xeerkan la inoo soo gudbiyay ee ina horyaal, waxay aniga ila tahay inay ceeb ku tahay iyo nusqaan cidii soo diyaarisay ee Gudidii u qaabilsanayd iyo Xogheynta uu ceeb ku yahay sababta oo ah cida soo diyaarisey may eegin inay diyaariyaan, cida loo keenayna wax ahmiyad ah may siinin hoosna umey eegin waxa loo keenay inuu ku haboon yahay in Goleyweynaha loo gudbiyo, waxay aheyd inay soo habeeyaan.

   Hadiise siduu u qoran yahay doodu ku socoto oo hadhow wax badan oo gudaha ku jira la is yidhaahdo hagaajiya waxaa is badali doona kalmado iyo qoraalo badan oo ku jira, markaa waxay u jeedeen cida soo diyaarisey in xeerkani jiifamo oo doodiisu badato oo wakhti ku lumo, waxaa la odhan karaa ma aqoon bay ka aheyd.

   Xeerka markaan u soo noqdo, maalintii dhoweyd ee la qeybiyay culimo badan oo ka qeyliyay oo lahaa waa ribo, Xeerka ina horyaala maaha in ribadu xalaal tahey iyo inkale, doodeenu waa Xeerka Ganacsiga Hawlaha Baananka oo ay ku hawlgalayaan Hay'addo badan oo maaliyadeed, markaa hadeynu xaga diinta ka eegno ribadu waxa weeye 4 diimood ee ilaahey soo rogay ribadu waa ku xaaraan gabigeedaba, inaga Diinta Islaamka Quraanka iyo Sunahaba waa ku xaaraan, Dastuurkeena iyo

shuruucda aynu ku dhaqanaana ma ogola wax xaaraan ah iyo in ribo lagu dhaqmo, Markaa waxaynu ka hadleynaa maaha ribo ee waa Ganacsi.

Ganacsiga waxaa ka mida xabagta lagu dhajiyo kabaha, suuqa hadaad tagto waxaad arkeysaa caruur darbi jiifa oo xabagtii ku cabaya inagu maynaan xaraameyn mana xalaaleyn kamana hadlin, cid odhaneysa waa xaaraane dalka yaan la keenina ma jirto, kan iibiyana uma keeno in ciyaalku cabaane wuxuu u keenaa manafacaad, marka inagu Bangiga ama hay'addii kale ribo ku shaqeysa si hoosa shaqo kuma lihin, waxaa ku shaqo hay'addaha ka masuulka ah.

Laakiin inaga waxaa la inooga baahan yahey inaynu ansixino Xeerka ina horyaal ee Ganacsiga Baananka wixii ka hor-imanaya Shareecada iyo Dastuuka ka saarno, waxaaa ka codsanayaa Gudoomiyaha oo xusuusinayaa xubnaha Golaha mawduuceenu inuu ku saleysnaado Xeerka Ganacsiga Baanka, ee aynaan u talaabin is hortaaga xeerka iyo inaynu ku saleyno ribo, hadii kale waxaan u qaadanayaa in la isu hortaagayo in loo shaqeynayo nin raba waxa la yidhaahdo **"ixtikaak"** oo ah ninka marka wax jabaan ay cadho galiso, marka wax qaaligaroobaan ay cadho galiso.

Markaa xeerkan aynu saxno oo wixii khaladaad ah ee ku jirana ha laga saaro, imisa dal oo islaam ah ayaa caalamka jira, imisa bangi oo aan ku shaqeyn oo aan xambaarsaneyn magaca islaam ayaa ka jira, imisa dal oo islaama oo ay ka mid yihiin kuwa waan diinta ka qaadano sida Masar iyo Sucuudiga ayay ka jiraa, ma jiraa dal islaama oo xaaraameeyay oo yidhi bangi aan islaami aheyn kama jiri karo dalkayaga oo lagama furi karo, taasina wax jira maaha.

Marka aynu u soo noqono dalkeena, imisa ardey, imisa jaamici ayaa wax u baranaya oo himaladiisa iyo hiigsigoodu yahay inay ka shaqeeyaan bangiyada kuwaana ha noqdaan ama kuwa caalamka ka jira eh, waxaan qabaa cidkasta oo Xeerkaa ka hortimaada inay cid u adeegeyso oo qalbi jab iyo niyad jab ay ku ridayaan ardeyga wax u baranayaa inay ka shaqeeyaan bangiyadeeda iyo kuwa caalamka.

Waxaan ku soo gabo-gabeynayaa, Xeerka Qodobadiisa oo aan aaminsanahey inay aad isku dhex daadsan yihiin xiliga ay haboonaanto in la soo hagaajiyo inaan doodiisa dib ugu soo noqonayo, waxaana qeyb

ka ah oo aan tilmaan idiin siinayaa Qodobka 1aad oo turjumaan ku qoran tahay in laga saaro oo laga dhigo erey bixin ama fasiraad, waayo turjumaad waa laba kalmadood oo la isu micneynayo oo midi afsomali tahey, midna afkale tahey.

Sidoo kale **qodobka 2aad** kuma jiro meesha, markaa hadeynu iminka wax ka saxno waxbaa is dhaafi doona, erey bixinta kan ugu horeeya ee ah "Xidhiidhiye" waa laba qeybood wax kala cadeynayana ma laha oo waxay aheyd in a iyo b laga dhigo, **Qodobka 4aad F/2aad** markaad akhrido waxa ku qoran xagey ku taal, markaa bal ha la eego Xeerka oo dib ha loo soo saxo.

2. **Md. Xaamud Cismaan Cigaal:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Xogheynta iyo Saxaafada waan idin salaamayaa, halka uu Mudane Aadan arkey dad badan way arkeen ee Xeerka habeynta uu soo jeediyay Mudane Xamze waan raacsanahey, hadii ay inagu furantay doodani oo in laga doodo la doonayo aniga waxay ila tahay baan ka doodayaa.

   23/April /2012 ayuu madaxweynuhu saxiixey Xeerkii Bangiga Dhexe, markaas waxaa bilaabmey weerar ay baanan ajnabi ahi soo qaadeen, CAC oo yamani leedahay, Jabuuti Base Bank, Salaama African Bank iyo Ban De Credit Jabuti oo ah qeyb ka mid ah bank Switzerland laga leeyahay, dabadeeto waxa uu Gudoomiyaha Bank Md. Cabdi Dirir wuxu sheegay inay filayaan in mudo saddex ilaa afar bilood ah lagu ansixiyo Xeerkan 2014 ayaynu joognaa iminka, wuxuu tilmaamey in dadka maal-galinta sameynaya ee Ajaanibka ah ay ka faa'ideysan doonaan free banks ka jira Somaliland, khatartuna halkaasey taagan tahay.

   Baananku lacag ay leeyihiin lama yimaadaan, waxay wax ku wadaan waa lacag ay dadku dhigteen, waxayney ku shaqeeyaan kalsooni lagu qabo, hadii markaa dadka baananka lacagta dhigtey ay ka shakiyaan oo yidhaahdaan lacagtayadii baanu dooneynaa Bangigii albaabada loo xidhayaa.

   Sida dhacdey crisis ka dhacey Mareykan ee loo bixiyay Black Thursday stock marketku wuu ku xidhmay, 1929kii wuxuu sababay oo horseeday in 10 sano dhaqaalihii aduunku uu hoos u dhaco, waxaa kaliya kor u soo qaaday wuxuu ahaa dagaalkii labaad ee Aduunka oo bilaabmay oo markaa Warshadihii bilaabmeen oo la sameynaya hubkii lagu dagaalamayay, qarnigii 19aad 12 jeer bay Baananku dhaceen, qarnigii

20aad 16 jeer bay dhaceen, qarnigan aynu ku jirno ee wali socda waxay dhaceen 21 jeer.

Sidaan maqalayo waxaa laga hadlay ribo, Baananku hadaaney islaami aheyn waxay ku shaqeeyaan waa ribo oo kaliya, wax kaloo jira ma jiraa, waxay wadaana waa ribo, way ka furnaan karaan, laakiin waxa weeye waxan aynu sameynaynaa ma Xalaal baa mise waa xaaraan.

Inagu dad yar baynu nahay oo Muslim ah, daarahan ay dadku dhisanayaan yaa ina siiyay, xagey ka timi, ma IMF baa ina siisay? IMFna inamey siin inamaba ictiraafsana, laakiin weerarku waxa weeye wadan yar aad ku mulkidaan oo lacagtiina, aad ku mulkidaan lacagta dadku leeyahay, aad ku mulkidaan deyn iyo amaah, inta aynu ku shaqeysanaa waa wadanka oo aan deyn lagu lahayn.

Taariikhda bal dib u akhriya, 1960kii ayaa afrika inta u badan xornimo heleen, bal manta xaguu marayaa dhaqaalohoodu, Nigeria ayaa ugu taajirsan imisaa deyn lagu leeyahay, markaa investment lama sameyn karo, horumar lama sameyn karo hadii wadanka deyn lagu leeyahay oo nin walba gurigiisa laga xaraashi, dawladuna haday is leedahay mashaariic ka samee oo lacag amaaho waana khatarta ugu weyn ee Wadanka hoos u dhigeysa.

Hadii aynu dooneyno horumar aynu sameyno Mashaariic Local ah oo aan ku saleysneyn ribo, oo dadku wuxuu doonayo wuu soo celin karaa, laakiin hadii la saaro waxaanu qaadi kareyn oo deyn ah waa waxyaabaha dunida lagu mulkiyo oo la doonayo in wadankeena lagu mulkiyo, baananku doonaya inay yimaadaan, shirkad markaad dooneyso aad sameyso ama aad maalgashato marka hore waxaa la sameeyaa (investigation) baadhitaan shirkadu xagey ka timi, yaa leh, share-holderskeedu wa’ayo, maxay maaliyad leedahay, directorku wa’ayo, sidey u shaqeysaa?

Markaa kuwa iminka inoo imanaya yaa leh? Switzerland waa meesha lacagta tuugada ah aduunka lagu xereeyo, hadii kan la dhaco ama mid kale la soo dhaco ayaa la geeyaa, markaa haduu kani laa-laabto dadku waxoodii xagey u raacayaan, aniga waxay ila tahay in wixii cad ee Islaamku inoo cadeeyay waa cadahey oo waa xaaraan oo kan ku shaqeysta hadii ganbo kaa soo gasho waa xaaraan, interstigaasi Yuhuudeyday u tageysaa.

Gudoomiye sidii Mudanayaashii iga horeeyay ay sheegeen Xeerka marka la soo habeeyo oo si fiican loo arko in laga doodo, anigu kan markaan ku daaley waan iska daayay oo waxaan u leexday inaan ogaado Banka sidii markii la ansixiyay iyo kuwa inoo diyaar ka ah ee 4taas aan sheegay ah, hadaad eegto websiteskooda maaha Baanan caan ah oo aduunyada laga yaqaano, kan Switzerland maan arkin isaga laakiin waxaan u arkaa inay kuwan kale ku xidhan yihiin, bank walibana Bank kale ayuu ku xidhan yahay oo xidhiidh la leeyahay kana damiin ah, dahab inoolamey iman, waxan ay doonayaan inay ku shaqeystaan waa lacagta ay doonayaan inay inaga inaga soo gasho, Markaa waxaan ku soo koobayaa aynu iska hubsano.

3. **Md. Ibraahim Caraale Cabdi:-** Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha marka hore waan idin salaamayaa, Mudane Gudoomiye, Mudanayaal, waxaynu mudo aan fogeyn isla ognahey inaynu ansixinay Xeerka Baananka Islaamka oo dhaqangaley Madaxweynuhuna Saxiixay, Xeerkan raga magac u bixinaya iyagaa u bixin doonee, ma waxaynu nidhaahnaa waa Xeerka Bangiyada aan Islaamiga aheyn mise waa Xeerka Bangiyada Ribawiga ah, waayo Xeerkii Baananka Islaamiga ah waynu ansixinay.

   Dooda mudanayaashu hadey dibada ku sheekeysteen iyo hadey ka doodeen sida mudanayaashii iga horeeyay waxay tilmaamayaan oo aynu leenahey alif waxbuu leeyahay iyo malaha labadaba way sheegayaan, horta ribada iyo wixii aan shareecadu ogoleyn Dastuurkuna ma ogola oo waxay ku cadahey **Qodobka 5aad F/2aad** iyo **Qodobka 14aad F/3aad** oo kala sheegaya inay reeban yihiin wixii Xeer ah ee ka soo horjeeda diinta islaamka oo wuxuu noqonayaa Xeerkani mid ka soo horjeeda Dasturka, kan kale oo sheegaya in ribada iyo macaamilooyinka ganacsi ee dhib u leh bulshada way reeban yihiin.

   Iyadoo waxyaabaha ilaahey kitaabkiisa ku sheegay ee reeban ay ciidaa ka badan yihiin, dastuurkeena yar oo ragii wax ka sameeyay ay aad u mahadsan yihiin, wuxuu markiiba xusay oo si cadaana ah u muujiyay ribada iyo dhibaatada ay leedahay, iyo inaan la ogoleyn in wadankan laga hirgaliyo bangi ku dhisan oo ku shaqeeya macaamilooyinka ribada.

   Mudanayaal inagoo runtii si dhab ah u eegeyna oo aan uurkeena waxba u qarineyn, inagoo iska indho-tireyn nusuusta ilaahey leeyahay “ilaahay wuu baabi’iyaa ribada iyo sadaqada wuu kordhiyaa” inagoo aan isha ka

lileynin waciidka uu Ilaahey inoo jeedinayo ee uu leeyahay" war kuwa mu'miniinta ahaw hadaad mu'miniin tihiin ribada iska daaya, hadeydaan iska deynin waxaad u diyaar garawdaan dagaal Ilaahey iyo rasuulkiisa ka yimaada"

War dalkeena iyo Goleheenaba mudanayaalow duruuftu way kala duwan tahay anigu ma qabo gacantiinana ilaashada afkiinana ilaashada, bidaari sibiq bay kugu gashaa, xeerkani wuu cadyahey, mar hadeynu Bangigii islaamiga ahaa dhameynay oo halkaa dhigney Maka ayuu ka furan yahay daliil maaha, inaanu daliil aheyn waan kuu cadeynayaa.

Xiligii Nabiga CSW markii Madiina la joogey ayaa munaafiqiintii mu'miniinta sheeganayay ee mu'miniinta la joogey waxay Madiina ka dhiseen Masjid, ilaahey wuxuu u bixiyay masaajidkii "Masjidu Diraar" oo quraanka ku sheegay, Maasaajidkaa waxaa loo dhisey in muslimiinta lagu dhibo ileyn waxyigii baa socdee Nabiga loo sheegay CSW, waxaa la sheegay inay ku dhaaranayaan inay wanaag u dhiseen, sida Bangigan la inoogu qurxinayo, ilaahey wuxuu sheegay inay beenaalayaal yihiin, waxaana la xukumey in la dumiyo masjidka, waayo u jeedada loo aasaasey baa xumeyd.

Markaa Gudoomiye waxaan leeyahay madaama Xeerkan u jeedada loo aasaasey ay tahay u jeedo khaldan waayo Xeerarkii Baananka Islaamiga ahaa waynu ansixinay, waxaan leeyahay Xeerkaasi waa Xeer khilaafsan Diinta islaamka iyo Dastuurka waligeedba ha laga doodo.

***Anigu waxaan soo jeedinayaa:-***

- Inaan Xeerkaa la ansixin waayo inuu Xeer ribawi yahay waxaa kuu cadeynaya **Qodobka 3aad F/4aad** oo cadeynaysaa in deyn la bixinayo dulsaarna laga rabo, madaama uu qodobada dhexdiisa ay kuwaasi ku jiraan, uuna yahay xeer ribawi ah yaynaan xaqiiqda iska indho tirin, hadii qodobada Dastuurka inoo qoron ay yihiin Valid shaqeynaya oo wixii shareecada ka hor imanayaa aaney inoo banaaneyn hadii kun jeer gacanta loo taago ma soconayo oo waa Xaaraan, qodobkaasina wuu cadeynayaa.

**Md. Obsiiye, Point of Order:-** qodobkan isaga ah wuxuu la mid yahay qodoba Xeerka Bangiga Islaamiga ah ee mucaamalaadka bangiga islaamka ah lagu hirgalinayo inay khadamaad qaadato, qodobka kale ee

sixid u baahan waxa weeye Dastuurkeena iyo Diinteena Islaamiga ah cid diideysaa ma jirto waxayna ku jirtaa soo codsiga ruqsada ee Qodobka 5aad ku cad in bangiga Somaliland hubinayo markuu ruqsada bixinayo loo soo gudbiyay in lagu gafey shuruucda dalka u taal oo uu bixinayo hadaanu shuruucda ku gafin, inaguna Xeer baynu dajineynaaye waxay waajib ku tahey ha'adihii qaabilsanaa inay wixii xeerkan ku qoran fulinyaan, mida kale Bangi Islaamiya waa in afka laga dhowraa oo la yidhaahdaa waa bangi mucaamalaaad islaamiya hirgalinaya, waayo kalmada bank maaha kalmad islaamiya, markaa macaamilaad islaamiya weeye.

**Sii socod, Md. Ibraahim Caraale:-** taasi waa dood anigu qodobkaan ka hadlayo waa dulsaar maaha khidmad, dulsaarkuna waa ribada asalka ee la isla yaqaano ileyn culimadu wadanka way joogta ninkii dooda ka qaba, qodobkan kale ee Bangiga Islaamiga ahna Xeerka Bangiga Islaamiga ah bay ku cadahey.

4. **Md. Cali Xasan Maxamed:-** anigu gudoomiye dood galiyo maayo oo xeerka ma akhriyin wax yar baan hayay, laakiin waxaa ii muuqday 150 qodob Xeer ka kooban oo la yidhaahdo Xeerka Bangiga Dhexe ayuu Goluhu ansixiyay, kan kale ee Islaamiga ah iyo kani labaduba kaasey hoos imanayaan, waa Xeer balaadhan Xeerkaasi, Markaa Xeerkani wuxuu u baahan yahay in lala akhriyo Xeerkaa Bangiga Dhexe, waxaa iminka ii muu qanayay dhowr iyo toban qodob oo xeerka hore tanaaqud ku sameynaya intii yareyd ee aan akhriyay, markaa hadii la yidhaahdo mid kasta sidiisa ha loo wado dee dadku maxkamadahey isku qabsan doonaan oo la lagu murmi doonaa wixiina waa dhaqaale, Markaa waa sharci in Xeerarka la isla akhriyo.

5. **Md. Maxamuud Jamac Cilmi (Dable):-** Shir-gudoonka iyo Mudanayaashaba ASC, Gudoomiye marka hore Mushkilad baa ina haysatoo wadanku waa wadan islaamiya waa inuu lahaado (Mufti Jamhuuriya) waayo waxan oo hadal ahi inama qabsadeen waxaa inaga dhiman waxa weeye in la helo Mufti jamhuuriga oo isagu if iyo aakhiroba qaada wixii ka yimaada, tusaale ahaan ninbaa Maxkamadu odhaneysaa waa la tooganayaa, aduunka lama yidhaahdo Madaxweynow saxiix in la toogto taasi waa xaaraan, waa in Muftigu soo saxiixo inuu muteystay in la toogto, marka inagu aynu sameyno Xeer ah in Dalka loo sameeyo Wadaad Mufti Jamhuuriya oo waxan oo dhanba la wareega.

Tan labaad, Gudoomiye waxa weeye waxaynaan aqoon u laheyn yaynaan iskaga hadline waxa wanaagsan dadka aqoonta leh in wax la weydiiyo, Nabigu CSW wuxuu yidhi ninka khamriga keenaya ha qasho khaansiirkana, hadeynu ribo fasaxeyno aynu fasano Khamriga iyo khaansiirka, Qodobka 14aad ee Dastuurka farqadiisa 3aad waxaa ku qoran inaaneyn ribada iyo lacagtan la leexsado iyo wixii xaaraan ahi aan la ogoleyn, qaar kalena waxa ku qoran inaaney banaaneyn khamrada sinada iyo wixii dadka xumeynaya, markaa midna miyaynu fasaxnaa midna deynaa.

Horta Gudoomiye waxa weeye Gudi walba markey soo dhameyso waxa loo direy waa inay soo qortaa waxay ka aragtey iyo waxay ku soo dartey, maaha intay halkaa soo istaagto kalaam faadil iska shubto, waa inay tidhaahdaa qodobka iyo qodobkaa sidaas ayaan u aragney ama ka dhigney, marka waxaan odhan lahaa Gudiddu ha soo qodobeyso waxay ku soo dartey iyo waxay ka soo badashey ileyn laba bilood bay haysteene yaaney inagu soo dhex tuurin uun.

Ruushkii baa qaatey Baanka Islaamiga ah, faransiiskii baa qaatey, inaga lacagteenu waxay ku taagan dhaqaalaha oo IMF aaney shaqo ku laheyn, hadii IMF soo dhex gasho dhaqaaleheen lacagteenu waxay noqonaysaa Malaayiin Shiling marka dollarka loo eego, marka si aynu iskaga xidhno, waa inaynu nidhaahnaa sharciga wadanka u yaala ee aynu ansixinay ee Baanka Islaamiga ah ha lagu dhaqmo, waana ka digayaa wax kasta waxay tagayaan qaali, hadaba ha u hanqal taagina eh ama dastuurka ha la raaco ama hadeynaan u laheyn aqoontii aynu Wasaarada Diinta iyo Awqaafta iyo Culimada nidhaahno ku soo dhajiyaan inuu sharci yahey iyo in kale wax aynu isku xiijinaa oo kale ma jiraan.

***Markaa anigu Waxaan soo jeedinayaa Gudoomiye:-***

- Gudi dib u soo eegta ha loo saaro ama Wasaarada Awqaafta Masuuliyada aynu u dayno oo iyagu ha ka soo talo-bixiyaan.

6. **Md. Axmed Barkhad Obsiiye:-** Shirgudoonka iyo mudanayaashaba waad salaamantihiin ugu horayn xeerkani maaha mid fiican sida uu u qoranyahay waxaa kale oo aad moodaa in xeerkan la soo turjumay (direct translation) lagu soo sameeyay oo meelaha qaar afsoomaaliguba waa qaldanyahay oo luuqada xataa uu ku qoran yahay maahan mid sharci, sidaa awgeed anigu waxaan leeyahay xeerkan dib ha loo celiyo ama gudi iyo rag aqoon yahano ah oo sharciga wax ka yaqaan oo luqad sharci ku soo qorta waanan ka baxay.

7. **Md. Xamse Maxamed Gaadaweyne :**- xeerkani waa markii 2aad ama 3aad ee Golaha la hor keeno in doorana waa laga hadlay oo hadii laceliyo iyo hadii la diidaba waa in meeshiisa la mariyo, doodeenii shalay ee aan isku yara qabanay waa xalaal iyo waa xaaraan , sideedaba waxa aan ka shaqaynaynaa ama aan pass garaynaynaa waa sharci sharciguna waa mid caalamka oo dhami ku dhaqmo ee nina lagu qasbi maayo waxaana la odhanayaa waa kuwaa baanankii kii commercial bank iyo kuwii kalaba ee maahan wax inaga inoo gaara.

   Markaa hadii aan doonayno in aan dhaqaalaheena kobcino oo aan kor u qaadno oo legal bank la helaa waa lagama maarmaan oo ay bangiyada kalana joogaan waan lagama maarmaan oo ay ka shaqeeyaan dalka waayo cidna lagu qasbi maayo, hadii la rabo foreign investment waa lagama maarmaan waana in la helaa commercial banks kale waayo yaynaan ka dhigin arinka mid religious ah waayo waa la ogsoon yahay in aan nahay dad islaam ah.

   Waxaan leeyahay yaan la majara habaabin sharciga waayo dadkii ka hadlay ee ahaa bankers ka waxay muujiyeen in aan bangiga islaamiga ah loobaqinba waayo isgaa hormood noqonaya, markaa ayay naan religious garayn xeerkan ee aan ka dhigno commercial banks waayo dunida oo dhan ayaa laga isticmaalaa oo xaramayn al shariifayn ayaa la macaamila oo waxaan isla takoornaa ma jiraana waa in aan sidaa samaynaa wa bilaahi towfiiq.

8. **Md. Cabdiraxman Yusuf Cartan:-** Waan idin wada salamayaa dhamaantiin waxaanan la qabaa mudanayaasha iga horeeyay in xeerkani uu yahay mid aad loogu baahan yahay waayo wadamabadan oo islaam ah ayaa laha isticmalaa xeerkan markaa ilama ahan in aan iska dhigno inaga oo aqoonteenu gaabantahay, waxaa kale oo jirta maadaama uu aduunku isku sii xidhmayo waa in shuruucdii loo baahnaa la isku sii habeeyaa.

Waa mida labaade Dastuurkeenu waxaa uu dhigayaa suuqa xorta ah xeerkana waxaa uu ka jawaabayaa suuqa xorta ah iyo siyaabaha loo maarayn lahaa, sidaa darteen waa in xeerkan la ansixiyo waayo waa wixii maamulilahaa saaka waana in baarlamaanku diyaariyo sharcigaa waana mid looga fadhiyo waxaanan qabaa doodaa diiniga ahi in aanay inoo oolin waayo xeerkani waxaa uu ka kooban yahay qodobo waana in la istultaago qodob qodob oo wixii la saxayo laga saxaa madaama uu yahay xeer loo bahan yahay waana in uu xeerku turxaan baxaa waayo waa ayaan daro in marlabaad uu xeerkani isaga oo qaldan soo maro baarlamaanka isga oo aan waxba laga qaban.

Sidaa awgeed hadii aad xeerkan akhri istidhaah wax sax ah maahan oo ka gayoon maysid markaa inta aan baarlamaan ahaan ka soo baxno doodan ah waa xaaraan iyo xaaraan maahan waxaa la inooga baahan yahay in aan saxno oo aam waxa la qabano xeerkan oo aan qodabadiisa aan galno ayay ila tahay.

Markaa hadii aan galo eray bixinta xeerkan in ay waxyaabo badani ka qaldan yihiin oo kalka baanka dhexe laga fasirayo waan in baanka Somaliland la fasiraa oo aan la fasirin baanka dhexe waayo wey is dhaafsan tahay sidoo kale meesha ah Raasamaanka Gundhiga ah waxaa uu la mid yahay Aduunka markaa eraygaa Aduunka maahan mid micnihiisa la fahmayo waayo siyaabo kale ayaa loo isticmaalaa ee waa in ka isticmaalaa Hantida saamilayda

Dhanka kale instuition eraygaasi waaxaa uu noqonaya hay'ad kumana haboona meesha ee waa in loo helaa financial institution ku haboon meeshaa, Sidoo kale public iyo privet ayaa jira waxaana public lagu sharaxay guud markaa guud kaligeed public noqon mayso oo xeer noqon maysee waa in la saxaa meeshaa.

Halka ka hoosaysa waxaa ku taali sarkaal guud iyo public entity isma qabanayaan waxaa kale oo ku sii xiga xafiis wakiilayd lamana fahmayo markaa waa in la saxaa erayadaa oo dhan meeshana kuma jirto eray layidhaa interest waa in meesha lagu soo daraa oo la qeexaa halkan waxaad ku aragtaa in ay wax kala xad xadeen waayo xeerna maahan wax la xadxadaa ee waa in sidii sa loo soo dhigaa.

***Waxaan soo jeedinayaa:-***

- In Xeerkan nuqurka af-ingriiska ah aynu ansixno kan Somaliga ah wax badan baa ka khaldane.

9. **Md. Xaashi Xuseen Caabi:-** shir-gudoonka iyo xildhibaanadaba waan salaamayaa xeerkana in badan ayaan soo haysanay doodiisuna kalfadhiyadeenii hore ayay bilaaban tahay dee walina waan wad xeerkana waxaa xeer loobahan yaha guud ahaan oo qofwalba u baahan oo waxaan ka

mid nahay aduunyahadan ayaan ku noolnahayna waa mid isku xidhan dhanka maaliyadeed oo inagu manihin jasiirad yar oo aan cidna xidhiidh la lahayn allana inga ma dhigo oo kan iyo qayrkiiba waan u baahanahay oo kuwo kalaba waan ansixinay oo islaamka ka sakaw dadbadan oo aan islaam ahayn dunidana arki maysid Christian bank ama diimo kale arki maysid.

Marka magaca uu wataa micno badan samayn maayo ee u jeedada uu xambaarsan yahay ayaa aad u mihiim ah ee xeerkan ina horyaalaa waxaa uu ku qurux badan yahay sida ragii iga horeeyay sheegeen waan in la keenaa nuqulkiisii hore ee Engiriisiga ahaa ha la inoo keeno oo waxaan u samaynayaa turjumaad ku haboon.

Markaa waxaa xeerkan macnaha ka dilay waa turjumaada lkn xeer ahaan intii aan ka akhriyay waa xeer aad loogu baahan yahay ganacsi ahaan waxanan leeyahay hala ansixiyo waayo waa xeer mihiim ah kaliya waxaan odhan lahaa qaladaadka ku jirana aan saxno oo aan hagaajino waayo magacana waa la badali karaa.

Baanku Qasnado ayuu leeyahay oo dad ayaa ka shaqeeya oo guryo ayuu kiraysanayaa oo waxan uu ku shaqeeyaa oo dhami lacag ayaa laga doonayaa adigana shaqo ayuu kuu qabanayaa oo tusaale ahaan qofka aan meel u direaa hadaba lagac yar ayaad siisaa oo waa khadamaad waxani.

***Waxaan Soo jeedinayaa:-***

- Guud ahaan xeerkan waa mid aan u baahanahay waana in la inoo keeno kii ingriisiga ahaa oo aynu ansixinaa waanad mahadsan tihiin.

**10. Md. Ibraahim Axmed Reygal:-** Gudoomiye iyo Xildhibaano waad salaaman tihiin, waxaan doonayaa inaan dhowr qodob aan ku darsado dooda, tan hore xeer ka hadlaya sida wax kasta oo macaamilkeena ah xeer u sameyno, hawlaha ganacsiga baanka ama arrimaha maaliyadeed waynu uga baahanahey xeer, hadaba Xeerkan ma u baahanahey iyo uma baahnin xildhibaanadu intey meel iska dhigaan, waayo xeerkan waynu u baahanahey.

Tan kale, xaaraan wixii ah ee ku jira sida xildhibaanku sheegayay oo ah wixii Diinta islaamka iyo Dastuurka ka hor-imanaya aynu ka saarno inaga xeer-dejintii ahe inagoo la gaashaneyna cidii aqoon u leh, taasina waxay ku imanaysaa inagoo qodobadiisa sidaa u marna ee kuma imaneyso in dusha laga mala ilaawo.

Gudoomiye xeerka Qodobadiisii baa halkan la inoo qeybiyay kama muuqato ama kuma jirto wadadii uu soo marey xeerku haduu Wasaarada Maaliyada ka yimi haduu baanka soo marey iyo Gudidda dhaqaalaha wixii ku dareen iyo waxay ka saareen midna halka kuma qorna lamina keenin, markaa taasina

waa wax ina caawinaya wadaduu soo maraye hadi Xogheynta ama shir-gudoonku hayo taana in la helo waa loo baahan yahay, waxaana filayaa inay gudida dhaqaalaha rag aqoon u leh ay ku jiraan, markaa ileyn wadan dhisan baynu nahaye waa la helayaa cid inaga caawsa wixii xaaraan ah iyo wixii aynu si kale aynu u aragno markaa Xeerkan aynu ka baaraan degno celinmeyno waa Xeer loo baahan yahay, marka aqoonteedii iyo dadka ka soo shaqeeyay waxay ka soo yidhaahdeen ha lagu soo lifaaqo halka kuma jirtee.

Qodobka kale ee aan xusayaa waxa weeye caalamku wuu macaamilayaa wadamo badan oo aan la aqoonsaneyn iyagaa aduunka ugu bangiyo waaweyn oo ugu shirkadu badan, marka macaamil ineyu aduunyada la yeelano waa lagama maarmaan, waxaanse soo jeedinayaa waa Macaamil noocee ah, markaad tidhaahto banaan aduunyada dhisan oo LC furi kara oo wax badan ka ganacsan kara oo wax rahman kara, oo la odhan karo hadaadan keyd ka haysanin waxaas baan u qaadanayaa dee kuwaa uma baahnin, waxaynu u baahanahey inaynu qeexno iskaashiga Caalamiga ah ee aynu u baahanahey sida inaga oo nidhaahna oo kale in Bangiga inoo imanayaa waa inaanu shiiqin kuwa wadaniga ah, aduunka waynu u baahanahay oo hadal kama taagna waxaa inoo imanaya inagu ma sameysano ama ma beerano.

Waxaan leeyahay aynu iska hubsano Iskaashiga Caalamiga ah iyo Baananka aynu heshiiska la galeyno, way jirtaa inaynu u baahanahey in lacag laguu soo daabaco oo wax lagu amaahiyo, markaa Xeerkaa yaanaan celine aynu ka shaqeyno cida aqoonta u leh aynu la kaashano oo Xeerka aynu celino.

***Markaa waxaan ugu dambeyn soo jeedinayaa:-***

- Gudoomiye si aynu uga saarno wixii khaladaad iyo Xaaraan ah aynu u yeedhno Wasaaradda Maaliyada, Gudidda Dhaqaalaha Bangiga iyo Cidii aqoon u leh ee Culimo ha halkan ha la soo fariisiyo si looga saaro muranka la sheegayo. Shir-gudoonka iyo Xogheyntana waxan ka codsanaya in wixii lifaaq ahaa la soo raaciyo Xeerka oo markaa inteynu si wanaagsan uga baaraan degno aynu ansixino.

11. **Md. Ibraahim Mahdi Buubaa:-** runtii dood badan ma doonayo inaan ka galo Xeerkan, Xeerkani in mudo ah buu Golaha ku rafanayay, mudadaa uu yaaley waxyaabo badan baa lagu soo hadal qaadey oo waxaa muu qatey in araa badan oo la isku hayo ay jirto, waxaase muhiima Gudoomiye Xeerku sida sharcigu dhigayo Mudanayaashu ha diidaan ama ha ansixiyaan marka doodiisu dhamaato waa in Cod la galiyo oo Golaha la horkeeno, waxaa dhacdey saddex jeer intaan garanayo in markasta marka laga doodo cod lama galiyo ee waa la iska dhigaa oo gudidda dib loogu celiyaa ka dibna kal-fadhiga xiga yaa la keenaa Golaha.

Dad badan baa Xeerkan u kadeedaan oo raajicinaya inay helaan Xeer Ganacsiga Baananka ah waxyaabo badan oo Xidhiidhka Caalamiga ahna waxbuu ka tarayaa, Sidaa Darteed waxaan soo jeedinayaa doodu markuu dhamaato in Mudanayaasha la weydiiyo Codkooda inay Xeerka diidaan iyo inay ansixiyaa, waxaana mudanayaasha u soo jeedinaya Xeerka dalku ka maarmaami maayo aynu ansixino.

12. **Md. Maxamed Cumar Adan:-** Shir-gudoonka iyo mudanayasha Golaha ku hadhay way salaaman yihiin, anigu runtii dood badan uma jeedo inaan soo jeediyo dhowr qodob baan odhanaya:-

Tan hore, bayja ka hore wuxuu ina tusayaa in xeerka la soo turjumay, waxaa fiican luqadeena inaynu garano sida wax lagu turjumo, waxaan soo jeedinayaa Xeerkan luuqada laga soo turjumey in la inoo keeno oo aynu eegno.

Sidoo kale, ribada wax la yidhaahdo dee waynu ognahay ilaahey wuxuu yidhi dagaal dhaba cidii ku dhaqanta, laakiin waxaa jirta in dadku si u wada arkeyn, waxaan dhageystay nin oo sida dad faro badan u fahansan yihiin si ka duwan u turjumaya oo uu lahaa waxyaabaha qaarkood waa la ogol yahay oo way dhici kartaa, waxaan kolkaa soo jeedinaya yaynaan ereygan ribada sida dadku u qaataan aynaan u qaadan ileyn masuuliyad baa dadka inaga saaran oo waxbaynu sameynaynaa waa inaynu u yeedhno culimada oo wareysano bal waxay u arkayaan ribada, waa laga yaabaa in dad culimo ahi inagu jiraan inteena halka fadhida, laakiin dad bani aadamka ah had iyo jeer siduu wax u arkayo ayaad qaadataa, markaa culimo ribadu waxa tahay inoo sharaxda waa inaynu u yeedhnaa.

Islaamic Bank Xeerkiisii baynu ansixinay kana intaynu gudideenii dhaqaalaha ee ka soo shaqeysay u yeedhno wixii iska hor-imanaya ay ka soo saaraan, waayo ceeb bay noqoneysaa inaynu wax iska hor-imanaya ansixino.

Waxaan kaloo odhan lahaa oo ku waafaqsanahey Ibrahim Xeerkani wax badan buu xambaarsan yahay markaa marka aynu si wanaagsan uga baaraan degno oo wixii ribo iyo khaldan ka saarno ileyn sharciyada qaarbaaba sanado baarlamaanka yaale, waxaynu u baahanahey waxaan ka hor-imanayn shareecada Islaamka iyo Dastuurka, sidaa darteed waxba yaynaan ka fakarin inta jeer ee ina horyimiye laakiin aan ka baraan degno aan Culimadeena u yeedhano, aan Wasaarada Maaliyada iyo Baankerkeena u yeedhano aan weydiino oo wareysano, marka aynu wixii ka dharagno aynu go'aan ka gaadhno.

13. **Md. Maxamed X. Xuseen Ciise:-** shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo shaqaaluhuba way salaaman yihiin, xeerka aad baa looga doodey oo ra'yi badan baa laga dhiibtey, markaa anigu waxaan leeyahay guud ahaan Xeerku

waa Xeer baan wuxuu la xidhiidhaa baayac-mushtari ama wax kala iibsi, marka la eego inaga Dastuur ahaan iyo dhaqan keena way iska caday oo wixii xalaal ah ee shareeca Islaamiya ogoshahey baynu qaadaneynaa wixii kale dhinac baynu iska dhigeynaa oo dastuurka sheegay.

Shareeca islaamiya intaan baan la sameynba way jirtey oo way iska cadahey oo wixii xaraan ah meel bay iska dhigtey marka muran malaha iyadu oo lagu murmi maayo, Baanka la sameynayo waa laba nooc sida la yaqaan oo kala ah Baanka Caalamiga ah oo ku basegareysan qawaaniinta dadku sameysteen iyo kan cusub ee Hada la sameeyay ee Shareecada Islaamiga ah la waafajiyay, Xeerarka horena waynu sheegnay sida Xeerka Baananka Islaamiga ee la sameeyay, kan haduu yahay Xeerka Baananka Caalamiga waxa ugu fudud ee la eegayaa waa Dastuurka markaa hadeynu sameysaneyno waan lagu cadeeyo Xeerka Muxuu ka reebayaa hadaanu ahey kii Baanka Islaamiga ah, markaa baanku ha yimaado oo dalka ha ka shaqeeyo laakiin waa in taas uun Xeerka lagu cadeeyo "Maxaa ka reeban ee Shareecadu ka reebaysaa iyo Dastuurku".

Markaa yaynaan waxba isku mashquuline Baananku dalka way imanayaane waa inay waafaqaan Dastuurka oo wuxuu ogol yahay iyo wixii aanu ogoleyna waynu ka saareynaa.

Waxaan ku raacsanahey Md. Jiir iyo Mudanayaashii ka horeeyayba hadii la doonayo in la cadeeyo waxa ribo ah iyo waxaynu xeerka ka reebayno oo aanu dastuurka iyo shareecadu u ogoleyn, markaa waa in Culimada loo yeedhaa si xeerka la isu waafajiyo, Xeerka waxaad moodaa cid furaneysa Baan inaaney cadeyn waxaan ku arkay Xeerka waxaa furan Baan Muwaadiniin kaliya, markaa halkaasi ma cada, yaan la odhan muwaadiniin kaliya, hadey noqoto marka baanku imanayo waa in dadka reer Somaliland share ku yeeshaan dee taasi waxay noqoneysaa xuurto, muwaadinka waa in la ilaaliyo laakiin maaha in ganacsiga la xuurteeyo, Markaa waa in Xeerku Cadeeyo cida Baan furaneysa.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ------------------------------------------------ | ------------------------------------------ |